

IIB MA GALO

FAAFINTA RASMIGA AH

الرسمية



الجريدة

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 12aad Muqdisho 2da Maajo 1984 Lr. 5

جمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanaadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O B N I I N

QAYBTA

KOOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 13 ee 4 Maarso 1984 Dhisid

Hay'adda Horseed ee Kallumeysiga BOG. 287

LAW N. 13 On 4 March 1984. Establishent
Of a Pilot Fisheries » 295

QAYBTA

LABAAD

XEER

W.

M.

QAYBTA

SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA
MID AH.—

Wakaaladda Madbacadda Qaranka



| | | |
|---|---|-----|
| MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 14.4.84. Lumid Buug Kayd L. 1126 ku qoran Cabdullaahi Weheliye Maxa muud L. 129 | » | 304 |
| MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 16.4.84. Lumid Jeeg War. L. 695599 ku qoran Cabdi Cali Saalax L. 130 | » | 305 |
| MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 25.4.84. Lumid J. War. L. 1980 ku qoran Cabdullaahi Ciise Cali L. 131 | » | 306 |
| MAXKAMADDA G. SH/DHEXE. 18.4.84. Lumid Buug Kayd L. 2321/5 ku qoran Cumar Cali Cumar L. 132 | » | 307 |
| MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR. 25.4.84 Lumid Buug Keyd L. 318.82 ku qoran Xabiiba Xuurshow Cismaan L. 133 | » | 309 |
| WARSHADDA MARMARKA IWM OGEY SIIS SHIR AH | » | 310 |

QAYBTA KOWAAD
SHARCI

SHARCI L.13 ee 4 Maarso 1984, Dhisid Hay'
ad Horseed ee Kallumeysiga

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO TIXGELIYEY Oggolaanshaha Guddiga Joo
gtada ah ee Golaha Shacbiga

WUXUU SOO SAARAYAA Sharciga Soo Socda:

Qod. 1aad

ASAASIDDA HAY'AD KALLUMEYSI

1. Sharcigan waxaa lagu dhisay Hay'ad Horseed u ah Kallumeysiga Xeebaha Waqooyi Bari, hadda ka dibna lagu magacaabi doono Hay'adda Kallumeysiga ee Xeebaha Waqooyi Bari.

2. Hay'adda Horseedka u ah Kallumeysiga Xeebaha Waqooyi Bari, waxay noqon doonta Hay'ad madax Banaan, iyadoo yeelan doonta Shakhsiyad qaynuumi ah iyo maamul madax Banaan.

Qod. 2aad

KORMEERKA HAY'ADDA

1. Dawladda Soomaaliyeed oo kaliye ayaa yeela naysa hantida Hay'adda.

2. Wasiirka Kallumeysiga ayaa masuul ka noqon doona Kormeerka Hay'adda.

3. Hay'adda laguma dhaqi doono sharciyada lam-16 ee 1.4.70 iyo lam-17 ee 21.4.74 ee ku saabsan awooda iyo hawlaha Hay'adda madaxa Banaan.

Qod. 3aad

XARUNTA HAY'ADDA

Hay'adda waxay xarunteedu noqon doontaa Muqdi, sho hase yeeshee waxay laamo ku yeelan doontaa deg mooyinka iyo Gobollada Jamhuuriyadda D. Soomaaliya taasoo laga yaabo inay lagama maarmaan ugu noqoto hawlaheeda.

Qod.4aad

UJEEDDOYINKA HAY'ADDA

Ujeedooyinka Hay'adda waa sida soo socota:

a) Inay soo saarto Kalluun, warshadeysan, kala saarto tijaabana u suuq geyso noocyada Kalluunka pe lagic ee Xeebaha waqooyi Bari iyadco la waafajinayo habka ugu dhow shuruudaha ganacsiga.

b) Inay u fidiso tababarro, taageero sa Infrastructure bulsho la soo xulay ee ka Kalluumeysata Xeebaha Waqooyi Bari iyo inay ururiso, warshadeyso keydiso, u suuq geysana gudaha iyo dibadda Kalluunka ay soo saarto.

c) Inay hore u mariso xaaladda dhaqan dhaqaale ee Kalluumeysatada taasoo lagu gaari karo iyadoo loo fidiyo tababarro, tashiilaad wax ku ool ah, infrastructure iyo fursado lagu horumarinaayo soo saarkeeda iyo heerka wax soo saarka.

d) Inay sameyso daraasado, tijaabooyin iyo shaqooyin kale oo lagama maarmaan u ah in loo qorsheeyo ballaarinta Hay'adda mustaqbilka soo socda.

Qodobka 5aad

AWOODDA HAY'ADDA

Hay'adda Waxay lahaan doontaa Awoodaha soo socda:

a) Inay soo qabsato, soo iibsato, xamaasho, kala saarto, kaydiso iyo suuq geyso wax soo saarka badeed oo nooc kasta leh, taasoo ujeeddadeedu tahay inay dha wrto sharci kasta oo kallunka la xiriira si loo ilaaliyo khayraadka kallunka.

b) Hay'addu waxay qoran kar'aa Shaqaale, iya doo heshiis la geleyso, inkastoo Hay'addu aqoonsan ta hay sharciga 36 ee 22.4.72, kuna saabsan shaqaalaha Hay'adaha madax banaan haddana Hay'adani wAxbA kama khuseyn doono sharciga kor ku qoran:

c) Inay shaqaaleyso, cusboonaysiiso xeel dheera yaal, la taliyayaal, wakiillo kuwaaso ku xiran hirgelinta

hawlahaa Hay'adda, si loo meel mariyo ujeedooyinka Hay'adda.

d) Guud ahaan iibka, kala bedelka, kiraysato ama hesho hanti guurto ah, oo ay ku jinaan doonyaha kallu meysiga ama doonyaha kale iyo qalabka looga baahan yahay hirgellinta iyo hawlaha Hay'adda.

e) Guud ahaan inay hesho xuquuq kasto ama wax kastoo lagama maarmaan oo macquul ah ee lagu gaari karo ujeedooyinka Hay'adda.

f) Inay iska gado, dhaafto, horumariso, ijaarto, bedelato, ama rahanto dhamaan ama qeyb ka mid ah xoolaha iyo xuquuqda Hay'adda.

g) Inay la gasho qandaraas, heshiisyo dawlado, ama Hay'ado (Sare, D/hoose ama cid kasta oo kale) ama Hay'adda kastoo kale, shirkado ama shakhsiyaad qeyb kastoo oo dunida ka mid ah oo ay Hay'addu dan ugu jirto.

h) Inay haysato, soo daymato lacag kasta oo ay ugu baahato fulinta ujeedooyinka Hay'adda iyadoo ku raadinaysa shuruudo munaasib ah.

i) Inay samayso, saxdo, oggolaato, saxiixdo, hoos u dhinto iyo soo saarto jeegag, dayn bixin, isdhaafin, qaansheeg, ballanqaad, qoraalo dayman, ka soo gatay, qaansheegtooyinka shixnadaha iyo heshiis kasta oo la xiriira wareejinta iyo xafidaada qalabka.

j) Inay ka furato xisaab bunuugta dalka gudahii sa iyo dibadiisa haddii ay ula muuqato lagama maarmaan iyo inay lacag dhigto ama qaadanayso xisaabaad kaasi.

k) Inay lacag daymiso, soo saarto, waregto dad ama Hay'ado macaamiil la leh Hay'adda iyo inay bixiso wax kastoo dhamaanado iyo magdhaw ah oo ay ula muuqato inay tahay lagama maarmaan.

l) Inay ururiso lacagaha ama daymaha kale oo ay hay'adda lagu leeyahay iyo inay tilaabo sharci ah ka qaado.

m) Inay samaysa wax alaala wax kasto lagu gaa ri karo ujeedooyinka Hay'adda.

Qodobka 6aad

XUQUUQDA HAY'ADDA

Iskaashatooyinka kalluumeysiga iyo bulshada hay'adda caawinto waxay Wasaaradda kalluumeysigu ka weydiisanaysaa inay wax soo saarkooda ka iibiyaan Hay'adda iyadoo sicirka ay Hay'addu wax kaga iibsane yso u noqoto ugu yaraan mid ka soo jiidan kara dalab kasta oo kale.

Qodobka 7aad

CANSHUUR DHAAF IYO XUQUUQ

1.) Hay'addu waxay noqon doontaa mid laga saamaxo canshuuraha iyo hawlaha muddo 5 (shan) sano ah.

a) Hawlaha furadaha iyo tariifada canshuurta soo dejinta oo nooc kasta oo qalab, allaab la xiriirta ji laabashada diyaarinta, duubida, qaboojinta, salimidda, iyo qaadida xamuulka badeeco badeed iyo canshuurta dhoofinta kuwaasoo loo iib geynaayo suuqyada caalamiga ah.

b) Dhamaan hawlaha Dekedaha iyo wixii la xirii ra hawlgelinta doonyaha Hay'adda ee la xiriirsan ururinta, xamuulka kallunka, qalabka alaabta iyo wax kas too Hay'addu u baahan tahay, laga keenay ama loo qaaday, tuulooyinka kalluumeysiga qaabka kala saarida iyo qaboojiyeyaasha ee goobta hawlgelinta Hay'adda.

2) Hay'adda waxaa kaloo ay Dawladda Soomaaliyeed u oggolaatay inay ka dhaafto inay bixiso canshuurta dakhliga ama faa'iidadaha ama shaqi kastoo canshuurku waajibisay muddo (5) shan sanadood ah laga bilaa bo 1.7.1984.

Qodobka 8aad

XUBNAHA IYO QAABKA HAY'ADDA

1) Hay'addu waxay yeelan doontaa xubno iyo qaab u dhisan sida soo socota.

- a) Guddiga Agaasinka b) Gudoomiyaha Gu/ga
- c) Maareeyaha Guud d) K. Maareeyaha guud
- 2) xubnaha Guddiga Agaasinka, howlihiisa iyo awoodiisa waxay ku cadyihiin qodobada soo socda.

Qod. 9aad

GUDDIGA AGAASINKA

1.) Guddiga Agaasinka ee lagu sheegay qodobka 8aad sharciga, wuxuu tilmaamayaa xubnaha soo socda.

- a) Wasiirka Kalluumeysiga ← Guddoomiye
- b) W. ku xigeenka Kalumeysiga — k.x. Guddomiye
- c) Maareeyaha Guud ee hay'adda — Xubin
- d) Wakiil B. Horumarinta Soomaaliyeed — xubin
- e) Wakiil Wasaaradda Maaliyadda — xubin
- f) Laba wakiil Ganacsatada gaar ahaan ee uu soo magacaabo Madaxweynaha J.D.S. Soona jeediyo Wasiirka Kalluumeysiga.

2. Xubnaha Guddiga Agaasinka oo wakiil ka ah Wasaaradda Maaliyadda iyo Bankiga Horumarinta Soo maaliyeed waxay soo magacaabayaa Wasiirka Maaliyadda iyo Gudoomiyaha Bankiga Horumarinta Soo maaliyeed iyagoo la tashanaayo Wasiirka Kalumeysiga

3. Fadhiyada caadiga ah ee Guddiga Agaasinka waxaa la qaban doonaa ugu yaraan laba jeer sannad kiiba. laakiin fadhiyada aan caadi ahayn waxay ku xiran tahay codsi ka yimaad xubin Guddiga ka mid ah waqti kasta.—

4. Maareeyaha Guud, isagoo tixgelinaaya talada Gudoomiyaha Guddiga Agaasinka, wuxuu xubnaha Guddiga Agaasinka ku gaarsiin doonaa qoraal (2) labo usbuuc ka hor waqtiga shirka la qabanaayo.

5. Xubin kasta wuxuu yeelan doonaa hal cod, Go'aanka wuxuu ku ansixi doonaa cod hal dheeri ah, hase yeeshee hadii codku isla ekaado, Gudoomiyaha ayaa yeelan doonaa cod dheeraad ah.

6. Guddiga Agaasinka wax Go'aan ah kama qaadan karo ilaa fadhiga ay ka soo qeyb galaan ugu yaraan (3) Seddex xubno mooyaane.

7. Xubnaha oo dhan, marka laga reebo Maareeya ha Guud, waxay xaq u leeyihiin gunno fadhi, cadadka gunnada waxaa oggolaan doona Wasiirka Kallumeysiga isagoo dhegeystay soo jeedinta Guddiga.

8. Dhamaan hadal qorallada shirarka, waxaa lagu qori doonaa luqadaha Soomaaliga iyo Ingiriiska.

Qodobka 10aad

MAS'UULIYADDA GUDDIGA AGAASINKA

Guddiga Agaasinka waxay mas'ul ka noqon doonaa, qeexidda siyaasadda Guud ee Hay'adda, iyadoo waafajinaaya hawlaha iyo ujeedooyinka, isla markaas waxay xaqiijin doonaan horumarkeeda.

Guddiga ayaa qariraaya miisaaniyadda sanadeedka, wuxuuna oggolaan doonaa cadaymaha xisaabaadka sannadka waxaa intaas dheer in go'aamada hoos ku qoran looga baahan yahay oggolaanshaha Guddiga Agaasinka.

a) Qandaraasyada caalamiga ah ay hay'adda ka qeybgeleyso, iyadoo raaceyso habka tartanka calamiga

b) Oggolaanshaha Barnaamijka shaqo sanadedka.

c) Dhamaan daymaha ay hay'addu galayso.

d) Wax kasto oo ay hay'addu ku gadeyso qiimo Go'an.—

e) Xisaab kasto oo ay hay'addu ka furaneyso Bunuugta.—

f) Magacaabidda Guddiga hanti dhowrka sida ku cad qod. 15aad.

g) Oggolaansho qaabka mushaaharka shaqaala ha ee hay'adda oo ay ku jiraan gunooyin iyo abaalgud yada.—

Qodobka 11aad

MUDDADA XILKA GUDDIGA AGAASINKA

Xilliga xafiiska xubnaha Guddiga, wuxuu noqon doonaa (2) labo sanno oo laga bilaabo waqtiga la maga caabay xubnaha. Xubnaha waxaa lagu magacaabi ka

raa iyadoo saldhig looga dhigaayo warbixinta Wasiirka Kalluumeysiga iyo in lagu dabaqo sida uu qoraayo qod-9aad qeybtiisa 2aad ee sharcigan.

Qodobka 12aad

MAGACAABIDDA SARAAKIISH HAY'ADDA

1. Maareeyaha Guud ee hay'adda waxaa lagu magacaabaa xeer Madaxweynaha J.D.S. Isagoo dhegeysa tu talada Wasiirka Kalluumeysiga.

2. Kaaliyaha Maareeyaha, waxaa magacaabaaya Guddoomiyaha Guddiga Agaasinka ka dib markuu tix geliyo talada Maareeyaha Guud iyo xubnaha Guddiga.

Qodobka 13aad

Mas'uuliyadda Maareeyaha Guud ee hay'adda

Maareeyaha Guud, waa madaxa fulinta hay'adda wuxuu awood buuxda u leeyahay mas'uuliyad kasta ee maamul ee hawl maamuleedka isagoo raacaaya siyaa sadda iyo miisaaniyadda uu qariray Guddiga Agaasin ka iyo ujeedooyinka hay'adda.

Qodobka 14aad

XISAABAADKA HAY'ADDA

m

1. Ugu yaraan seddex bilood, ka dib ee dhamaad ka miisaaniyadda sannadeedkasta ee hay'adda Maareeyaha Guud, waa inuu soo hordhigaa Guddiga Agaasinka, dheelitirka wixii faa'iido iyo khasaaro iyadoo laga tusinayo habka maaliyadda iyo natiijooyinka maaliyadeed ee hay'adda iyo hawlaha miisaaniyadda ee sannadeedkaasi.

2. Iyadoo ay u dhan tahay dokumentiga dheelitirka sannadeed, Maareeyaha Guud wuxuu horkeenayaa Guddiga Agaasinka, sida loo dhaqan geliyey warbixinta sannadeedka iyadoo laga warbixinaayo hawlaha hay'adda inta lagu jiray hawlaha sanadka lagana hadlaayo, lana qiimaynaayo horumarka dulinta ujeedooyinka hay'adda lana ifinayo waxyaabihii ugu waaweynaa oo ay hay'addu la kulantay sannadkaa.

Warbixinta sanadeedka waxay kaloo ka koobnaan doontaa wararka ku saabsan qodobadan.

- a) Tirada shaqaalaha iyo mushaaharka la bixiyey
- b) Heerka wax soo saarka dhinacyada xeebaha iyo badweynta.
- c) Heerka iibka Sruuqyada gudaha iyo dibadda.
- d) Qiimeynta ganacsiga ee barnaamijyada xeebaha iyo badweynta.

3. Guddiga Agaasinka wuxuu oggolaan doonaa caddeynta xisaabaadka kama dambays 31 Maarso sanad kasta iyadoo la socoto warbixin sannadeedka shaqooyi nka hay'adda waxaana u gudbin doona Madaxweynaha J.D.S, Iyo Wasiirka Maaliyadda, Guddoomiyaha Guddiga Agaasinka.

4. Warbixinadda oo dhan iyo cadaymaha maaliyad da ee ku qoran qodobkan waxay noqon doonaan luqada ha Soomaaliga iyo Ingiriiska.

Qodobka 15aad

BAARISTA XISAABAADKA

Xisaabaadka sanadka ee hay'adda waxaa baari doona baare madax banaan oo ay magacaabaan Guddiga Agaasinka.—

Sidoo kale waxaa baari karo hantidhowrka Guud haddii Guddiga Agaasinka u arko inay tahay dan.

Qodobka 16aad

MIISAANIYADDA HAY'ADDA

Ugu yaraan Seddex (3) bil ka hore ee dhamaadka xisaab sanadeed kasta, Maareeyaha Guud wuxuu hor dhigayaa Guddiga Agaasinka si ay u oggolaadaan ku talo galka miisaaniyadda sannadka xiga.

Qodobka 17aad

HABAYNTA QAABKA HAY'ADDA

Hay'addu waxay lahaan doontaa xeer hoosaad iyo qorsho shaqo oo faahfaahinaaya xuquuqda, xilka iyo hawlaha shaqaalaha, taasoo uii soo diyaariyey Maaree yaha Guud.—

Qodobka 18aad
HANTIDA HAY'ADDA

Hantida hay'adda waxay ka kooban tahay.

a) dhamaan hantida guurtada iyo ma'guurtada doonyaha iyo qalabka la soo iibiyey, lagu deeqay ama si kastaba ha ugu yimaadee Hay'adda.

b) Dhamaan lacagaha dhigaalka hay'adda ama hay'addu masuul ka tahay Banki kasta gudaha iyo dib adda Soomaaliya iyo wax kastoo ay qabsan ama masuul ay hay'addu ka tahay.

c) Dayn kasta oo ay hay'addu ku leedahay macaa miisha ama qof kastoo urur, wakaalad ama wakaalada ha Daladda.

d) Dhamaan kaydka wax soo saar iyo qalab ay hay'adda laga helo.

Qodobka 19aad
SANAD MAALIYADEEDKA

1. Xisaab sannadeedka hay'adda wuxuu bilaaban doonaa 1 Jennayo wuxuuna dhamaan doonaa 31da Disember sannad kasta.

2. Faa'iidooyinka ka yimaada hawlaha hay'adda waxaa loogu faa'iida doonaa hay'adda, iyadoo saldhig looga dhigayo go'aanka Guddiga Agaasinka, kaasoo tix gelin doono lacagaha looga baahan yahay dhaq dhaqaaqa mustaqbilka.

Qodobka 20aad
XEER NIDAAMIYE

Madaxweynaha J.D.S. Wuxuu awood u leeyahay inuu soo saaro Xeer nidaamiye khuseya hirgelinta sharcigan.—

Qodobka 21aad
DHAQANGAL

Sharcigan wuxuu dhaqan geli doonaa, marka la sa xiixo, waxaana lagu soo saari doonaa faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 4 Maarso 1984

MADAXWEYNAHA J.D.S.
S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

Law N. 13 on 4 March 1984. Establishment of a Pilot Fisheries Enterprise.—

The President of the Somali Democratic Republic
HAVING SEEN: The Constitution of the Somali Democratic Republic,

TAKING NOTE: Of the approval of the National Assembly of the Somali Democratic Republic.

HEREBY PROMULGATES

THE FOLLOWING LAW

ARTICLE I

ESTABLISHMENT

Establishment of a pilot fisheries Enterprise.

1) By this law the North East Coast Fisheries Enterprise is being established and from now on shall be called «The Enterprise».

2) The North East Coast Fisheries Enterprise being an autonomous Enterprise will possess a Juridical Personality, and financial autonomy.

ARTICLE 2

SUPERVISION OF THE ENTERPRISE

The Somali Government being the sole owner of the assets of the Enterprise the Minister of Fisheries shall be responsible for the supervision of the Enterprise as Chairman of the Board of Directors of the Enterprise. The Provisions regarding the supervision of autonomous agencies contained in law No. 16 of 1st. April 1970 and law No. 17 of 21st. April 1974 shall not apply to the Enterprise.

ARTICLE 3

THE HEAD OFFICE OF THE ENTERPRISE

The Enterprise shall have its head office in Mogadishu, but may establish Branch Offices in the Regions and Districts of the Somali Democratic Republic and abroad, as may be deemed necessary for its operations.

ARTICLE 4

OBJECTIVES OF THE ENTERPRISE

The Objectives of the Enterprise are as follows.

a) To carry out industrial fishing, processing and marketing trials for a variety of pelagic species of fish in Northern Somali waters in as near commercial conditions as possible.

b) To provide training, support facilities and infrastructure to selected fishing Communities on the North coast, and to engage in the collection, processing, storage, domestic and export marketing of their catch.

c) Through the provision of training, support facilities and infrastructure, and thus the opportunity to improve overall production and productivity, to improve the socio economic status of the said communities.

d) To carry out studies, trials and other activities necessary to plan the future expansion of the Enterprise.

ARTICLE 5

POWERS OF THE ENTERPRISE

The Enterprise shall have the following powers.

a) To capture, purchase, transport, process, store and market marine products of all descriptions, subject to the provisions of any fisheries legislation in regard to fishery resource protection.

b) To employ such personnel as the Enterprise may require on such terms and conditions as may be appropriate to carry out its obligations, and recognizing that the law No. 36 of April 22nd. 1972 concerning the personnel of Autonomous Agencies shall not apply to the Enterprise.

c) To Employ and remunerate experts, consultants, agents or firms in connection with the implementation and operation of the Enterprise, with a view to achieving the objectives of the Enterprise.

d) Generally to purchase, to take on lease or in exchange, hire or otherwise acquire, any real or mova

ble property, including fishing vessels, other boats and equipment needed for the implementation and operation of the Enterprise.

e) Generally to acquire any rights or privileges necessary or convenient in achieving any of the Enterprise's objectives.

f) To sell, let, improve, develop, lease, mortgage, exchange or otherwise dispose of all or any part of the property and rights of the Enterprise.

g) To enter into contracts, agreements or arrangements with Governments or authorities (Supreme, municipal, local or any other) or any corporations, companies or persons in any part of the world as may further the interests of the Enterprise.

h) To raise, borrow, or secure any moneys needed for any purpose of the Enterprise and on such terms and conditions as may seem expedient.

i) To make, draw, accept, endorse, discount and issue, cheques, credit notes, bills of exchange, promissory notes, debentures, bills of lading and other negotiable or transferrable instruments or securities.

j) To open such accounts with banks inside and outside of Somalia as may be necessary, and to make any deposits and withdrawals of the Enterprise's funds into or from such accounts.

k) To lend money and issue warrants to such persons or corporations as may seem expedient and in particular to customers of, suppliers to and any other persons having dealings with the Enterprise, and to give any guarantees or indemnities that may seem expedient.

l) To collect moneys or other debts owed to the Enterprise, and to take any necessary legal action in its name.

m) To do all such things as are conducive or incidental to the attainment of the objectives of the Enterprise.

ARTICLE 6

RIGITS OF THE ENTERPRISE

The fisheries cooperatives and communities assisted by the Enterprise shall be required by the ministry of

fisheries to offer their production for sale to the Enterprise.

Provided that the prices offered by the Enterprise are at least as attractive as any alternative offer.

ARTICLE 7

TAX EXEMPTIONS AND PRIVILEGES (PRIVILEGES)

1. The Enterprise shall be exempt from the following taxes and duties for a period of five years.

a) Customs duties, charges and any tariffs and import taxes on all manner of materials, goods and equipment relating to the catching, processing, packaging, freezing, handling and transportation of marine products and also export taxes or levies on the sale of such products in international markets.

b) All port and harbour dues and charges relating to the operation of vessels of the Enterprise engaged in the collection and transportation of fish, materials, goods and any supplies necessary to the Enterprise, from or to ports, fishing villages, processing establishments and cold stores within the Enterprise's area of operation.—

2. The Enterprise will also be allowed by the Government of Somalia a remission from payment of income or profits tax or and other business taxes for a period of five years from 1st July 1984.

ARTICLE 8

ORGANS AND STRUCTURE OF THE ENTERPRISE

1. The Enterprise shall have the organs and structure set out as follows.—

- a) Board of Directors.
- b) Chairman of the Board.
- c) General Manager.
- d) Assistant General Manager.

2. The Membership of the Board of Directors, its functions and powers are prescribed in the subsequent articles.

ARTICLE 9

THE BOARD OF DIRECTORS

1. The Board of Directors referred to in Article 8

of this law shall consist of the following members—

- a) The Minister of Fisheries Chairman
- b) The Vice minister of Fisheries Vice Chairman
- c) The General Manager of the Enterprise
- d) A Representative of the Somali Development Bank
- e) A Representative of the Ministry of Finance
- t) Two Representatives of the private business community, appointed by The president of the Republic on the recommendation of the Minister of Fisheries.

2. Members of the Board of Directors who are representatives of the Ministry of Finance and the Somali Development Bank shall be appointed by the Minister of Finance and the President of the Somali Development Bank respectively, in consultation with the Minister of Fisheries.

3. Ordinary meetings of the Board of Directors shall be held at least twice a year, but extraordinary meetings may be held at the request of any member at any time.

4) The General Manager, taking note of the advice of the Chairman of the Board shall notify members of the Board in writing, two weeks in advance of the date of the next meeting.

5. Every Director shall have one vote. Decision shall be taken on a Simple majority, but if voting on any issue is equal, the Chairman shall have the casting vote

6. No decision of the Board of Directors shall be valid unless taken at a properly convened meeting where a quorum of at least three Directors are present.

7. All Directors except the General Manager shall be entitled to receive sitting allowance, and the amount of such allowances shall be approved by the Minister of Fisheries on the recommendation of the Board.

8. The minutes of all meetings of the Board shall be written in both the Somali and English languages.

ARTICLE 10

RESPONSIBILITIES OF THE BOARD OF DIRECTORS

The Board of Directors shall be responsible for the

formulation of the General policy of the Enterprise in relation to its activities and objectives and for monitoring its progress.

The Board shall determine the annual budget and approve the annual statement of accounts. In addition the following decisions shall require the approval of the Board of Directors—

a) Contracts to be entered by the Enterprise under international Competitive Bidding procedures.

a) Contracts to be entered by the Enterprise under international Competitive Bidding procedures.

b) Approval of annual work programs.

c) All borrowings to be made by the Enterprise.

d) Any sale of fixed assets of the Enterprise.

e) The opening of any Bank Account of the Enterprise—

f) Appointment of Auditors for the purpose of Article 15.

g) Approval of the salary structure of the Enterprise, including allowances and Gratuities.

ARTICLE 11

TENURE OF OFFICE OF MEMBERS OF THE BOARD OF DIRECTORS

The tenure of office for Board Members shall be two years from the date of their appointment. Members may be appointed for subsequent terms at the discretion of the Minister of Fisheries and in accordance with the provisions of Article 9 section 2 of this law.

ARTICLE 12

APPOINTMENT OF THE ENTERPRISE

1. The General Manager of the Enterprise shall be appointed by Decree of the President of the Republic having heard the recommendation of the Minister of Fisheries—

2. The Assistant Manager shall be appointed by the Chairman of the Board, having taken due note of the advice of the General Manager, and the members

of the Board of Directors.

ARTICLE 13

RESPONSIBILITIES OF THE GENERAL MANAGER

The General Manager shall be the executive head of the Enterprise, and shall have full authority and responsibility for all aspects of the administration, day to day operation within the policy and budgets established by the Board of Directors, and the stated objectives of the Enterprise.—

ARTICLE 14

ACCOUNTS OF THE ENTERPRISE

1. Not later than three months after the end of each financial year of the Enterprise the General Manager shall present to the Directors for adoption by the Board, a balance sheet and profit and loss account showing the financial status, and the financial results of the Enterprise's activities for that financial year.

2. Together with the annual balance sheet the General Manager shall submit to the Board of Directors for adoption, an annual Report describing the activities of the Enterprise during the preceding year, mentioning and evaluating progress in implementing the objectives of the Enterprise, and bringing to light major or extraordinary circumstances that have positively or negatively affected the year's results and the Enterprise's status.

The annual report shall also contain information on the following subjects.

- a) Number of Employees and salaries paid
- b) Level of production in both inshore and offshore sectors
- c) Level of sales in domestic and export markets
- d) Commercial evaluation of both inshore and offshore programs.

3. The Board of Directors shall approve the statement of accounts not later than 31st March of each year, and these together with the annual report of the Enterprise's activities shall be presented to the preside

nt of the Somali Democratic Republic and to the Ministry of Finance by the Chairman of the Board.

4. All reports and financial statements referred to in this Article shall be in both the Somali and English languages.

ARTICLE 15

AUDITING OF THE ACCOUNTS.

The Annual Accounts of the Enterprise shall be audited by an Independent firm of Accountants appointed by the Board of Directors. The Accounts may also be audited by the Magistrates of Account as and when deemed necessary by that body.

ARTICLE 16

BUDGET OF THE ENTREPRISE

Not later than three months before the end of each financial year the General Manager shall submit to the Board of Directors for approval a fiscal and manning budget for the next financial year.

ARTICLE 17

ORGANISATIONAL ESTABLISHMENT OF THE ENTERPRISE

The Enterprise shall have an internal organisation and work plan, detailing the rights, responsibilities, and activities of the personnel, which shall be prepared by the General Manager.

ARTICLE 18

ASSETS OF THE ENTERPRISE

The assets of the Enterprise shall consist of:

a) All fixed and movable property, vessels and equipment purchased, donated, or otherwise legally acquired by the Enterprise.

b) All moneys deposited by the Enterprise, or on the Enterprise's behalf with any banking institution

inside or outside Somalia, and all cash held by or on behalf of the Enterprise.

c) Any debt owed to the Enterprise by any purchaser, supplier or other persons, corporation, agency or state agency, an account of product delivered or for any other reason.

d) All stocks of products or materials held by the Enterprise.

ARTICLE 19

FINANCIAL PROVISIONS

1. The financial year of the Enterprise shall commence on its January and end on the 31st. December of each year.

2. The profits from the operation of the Enterprise shall be utilised by the Enterprise in accordance with decision of the Board of Directors who shall have considered the amount of funds required for future operations and for reserves.

ARTICLE 20

REGULATIONS

The president of the Somali Democratic Republic shall have the power to issue Regulations for the proper implementation of this law.

ARTICLE 21

SEPARATE FORCS

This law shall come into force on the date of its signature and shall be published in the official Bulletin.

Magor General Mohamed Siad Barre

PRESIDENT

Of the Somali Democratic Republic

QAFBTA SADDEXAAD
TALOOPYIN ISGAAR SIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA
MID AH—

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Buug Kayd dhumay oo lambar
kiisu ahaa 1126 lagana soo saaray Bangiga Ganac
siga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 5aad kuna
qoran lacag dhan Sh. So. 2.045/ = uu iska lahaa Cab
dullaahi Weheliye Maxamuud sida ku cad warqad
da lambarkeedu yahay 0952 taariikhdeedu 14.4.84
ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed
Laanta 5aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lam.2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEEY

In la baabi'iyoo (Ammortamento) Buugga Kaydka
Lam. 1126 oo ku qoran magaca Cabdullaahi Weheliye
Maxamuud ayna ku jirto Sh. So. 2,045

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed
Laanta 5aad u beddelo Buugga Kaydka ee kor ku til
maaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka
soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maa
linta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee
JDS, haddii inta ka horaysa aan ishortaag laga keenin.

Muqdisho, 14.4.84

GUDDOOMIYAHA MGB

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In J. Wareega dhumay oo lambar kiisu ahaa 695599 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta C/Gaabo kuna qoran lacag dhan Sh.So. 50.000/ uu iska lahaa Cabdi Cali Saalax sida ku cad warqadda lambar keedu 1205 taariikhdu 14.4.84 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta C/Gaabo;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lam-2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEEY

In la baabi'iyoo (Ammortamento) J. Wareega Lam 695599 oo ku qoran Cabdi Cali Saalax ayna ku jirto Sh.So. 50.000/=.

WUXUU FARAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta C/Gaabo u badalo Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee DS, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqlisho, 16.4.84

GUDDOOMIYAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU ARKAY: In J. Wareega dhumay oo lambar kiisu ahaa 1980 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Xarunta kuna qoran lacag dhan Sh. So. 100.000/= uu iska lahaa Cabdullaahi Ciise Cali sida ku cad warqadda lambarkedu ahaa 01072 taariikhdu 25.4.84 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lam. 2 ee 9.9.65

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyó (Ammortamento) J. Wareega Lam. 1980 oo ku qoran Cabdullaahi Ciise Cali ayna ku jirto Sh. So. 100.000/=.

WUXUU FARAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta u badalo Jeega War. ee kor ku tilmaan una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 25.4.84

GUDDOOMIYAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 131

MAXKAMADDA G. SH/DHEXE JOWHAR

GUDDOMIYAHA M.G.SH/DHEXE JOWHAR

HADDUU ARKAY: Dacwadda uu soo qortay Cumar Cali Cumar deggan Degmada Jowhar oo uu ku ca banaayo inuu ka dhumay Buugga Kaydka Lacagta ka soo baxay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soo maaliyeed Laanta Jowhar Buuggaas (oo ku qoran magaca Cumar Cali Cumar Lambarkiisuna ahaa 2321/5, kuna qoran tahay lacag dhan Sh.So. 21.078.00 Labaatan iyo kow kun todobaatan iyo siddeed Shilin Soomaalo;

Guddomiyaha hadduu ogaaday inuu dhumay Buuggaas Taariikhdu markay ahayd 24.3.64 sida ku qoran Arjigiisu Dacwoodaha, Hadduu Arkay Ogeysiiska Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Maga ceeda ker ku xusan yahay. Hadduu Arkay Qod. 69, sharciga Lambarkiisu yahay (2) soona baxay 9.9.65 wuxuu Amrayaa in loo Cusbooneysiyo Buugga Kaydka Lacagta kadib markay ka soo wareegto 30 Casho laga bilaabo maalinta Dekereetada Sharciso Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda. Waxaa la Codsanayaa in Buugga Cusub ee la sameynaayo gacanta laga saaro Cumar Cali Cumar ama cid wakaalad Sharci ah ka haysato kadib markay dhammaato 30 maalmood ee aan kor ku soo sheegnay.

GUDDOMIYAHA M.G.SH/DHEXE JOWHAR

Dr. Bashiir Raabi Faarax

L. 132

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR.

HADDUU ARKAY: Dacwadda Kor Ku Qoran:

HADDUU ARKAY: In Buug Keyd Dhumay oo Lam-ahaa 318.82 lagana sx saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Dhexe kupa qo-
ran lacag dhan Sh.So. 10.510 uu iska lahaa Xabii-
ba Xuurshow Cismaan sida ku cad warqadda lam-
barkeedu yahay 0000597 taariikhdeedu 25.4.84. ee
Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed
Laanta Dhexe.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyó (Ammortamento) Buug Keyd lam-
318.82 oo ku qoran magaca Xabiiba Xuurshow Cism-
aan ayna ku jirto Sh.So. 10.510

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed
Laanta Dhexe u bedelo Buugga Keydka ee kor ku til-
maaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay
ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood
maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga
ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hortaag la-
ga keenin.

Muqdisho; 25.4.84.

HADDUUMIYAHAA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR

Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

WARSHADDA MARMARKA IWM.

OGEYSIIS SHIR CAADI AH

Dhammaan Saamileyda Shirkadda leh ee Warshad da Marmarka waxaa la ogeysiinayaa inuu jiridoono fa dhi Caadi ah maalinta bishu tahay 24.5.84 saacadda 4.30 Galabnimo iyo maalinta 7.6.84 isla saacadda lagu qaban doono Saldhigga Warshadda Marmarka.

Ajendada Shirka waa kuwa hoos ku qoran:

1. Ogolaanshaha Miisaaniyadda Sannadka 1983.
2. Kordhinta Raasumaalka Shirkadda.
3. Iyo Wixii kale ee soo raaca.

GUDDOOMIYAHA

Baashi Maxamed Faarax

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In J. W. Dhumay oo Lambarkii

su ahaa 648089 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Balad-Weyne kuna qoran lacag dhan Sh.So. 50.000/= uu iska lahaa Cali Maxamed Faarax sida ku cad warqadda lambarkeedu 4801 taariikhdeedu 30.4.84 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Balad-Weyne;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEEY :

In la baabi'yo (Ammortamento) J. Wareega Lam. 648089 oo ku qoran Cali Maxamed Faarax ayna ku jirto Sh.So. 50.000/=.

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta B/Weyne u badalo J.Wareega ee kor ku tilmaa man una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 30.4.84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax